

Erey Bixin (Glossary)



1 Appeal

Markii aad qof ama urur waydiisato inay dib uga fekeraan go'aankooda.

2 Asylum and Immigration Tribunal (AIT)

Maxkamadda Socdaalka ino Magangalyo doonka (The Asylum and Immigration Tribunal) waxay dhagaysataa go'aanna ka gaartaa racfaanada ku aadan go'aamadii ay gaartay Wasaarada Arrimaha Gudaha ee arrimaha la xiriira magangalyo doonka, socdaalka, iyo sinjiyada.

3 Asylum process

Waa nidaamka aad marayso marka aad waydiisato dawladda Ingiriiska inay kuu ilaaliso sida qaxooti ka soo cararay dhibaato loogu gaystay waxa uu qabo ama rumaysan yahay.

4 Budget

Inaad qorshayso sida uu kaaga baxayo kharashka lacagta aad adiga haysato.

5 Careers adviser

La-taliye xagga mihnadaha (careers) waa qofka aad kala xaajoonayso waxyaalaha aad xiisanayso iyo rabitaanadaada si aad markaas u gaarto go'aano ku saabsan waxbarashadaada, tababarkaaga ama shaqaalayn.

6 Case Owner

Qofka ka socda Wasaarada Arrimaha Gudaha ee masuulka ka ah kiiskaaga magangalyo doonka.

7 Censored

Haddii akhbaar la faaf-reebay (censored) dib ayaa lagaaga reebay maxaa yeelay waxaa loo arkay inay adiga khatar kugu tahay.

8 Child Protection Register

“Liis magacyo caruur iyo dad dhalinyaro ah oo ay da'doodu gaarayso illaa iyo 18 sano kuwaasoo loo maleeyo inay khatar ku jiraan ama ay soo mareen dhib ama faraxumayn la taaban karo. Faraxumaynta waxay noqon kartaa mid faraxumayn jir ahaaneed, faraxumayn dareen aheeneed ama dayac.”



9 Confidentiality

Waa fahmidda akhbaarta aad siisay qof kale in ay ahaanayso mid loo xafiday sir ahaan qof kalena aanan lala qabysanayn adigoo aan lagaa haysan ogolaansho.

10 Counsellor

La-taliye (Counsellor) waa qof khabiir ku ah siinta talooyinka ama hagitaanka qayb gaar ah ee cilmiga.

11 Discretionary Leave

Sharciga la siiyay dadka loo diiday sharciga qaxootinimda kuwaasoo aanan buuxin sharuudaha Humanitarian Protection, laakiin loo ogolaaday inay si ku meel gaar ah u joogaan Ingiriiska sababo kale. Waxaa la bixiyaa oo keliya marxalado aad u xaddidan.

12 Education Services

Adeegyada waxbarashada waa waaxda dawladda hoose ee masuulka ka ah waxbarashadaada.

13 Exploit

U isticmaalida qof kale siyaabo danaysi qof ahaaneed kuwaasoo iyaga damqin kara ama dhaawaci kara.

14 Family tree

Sawir tusaya qof qoyskiisa dhowr jiil (generations) oo kala duwan.

15 File

Faayal waa xogta qoraalka ah ee adiga kugu saabsan ee ku xafidan waraaq ama kombiyuutar.

16 Foster parents

Kuwan waa dad ay soo xuleen hay'adaha awooda leh kuwaasoo xanaaneeya caruurta si ku meel ku garh ah maxaa yeelay waalidkood waa ay awoodi waayeen inay xanaaneeyaan sababo gaar ah awgood. Foster parents waxa ay xanaanayn doonaan cunuga illaa iyo inta loo baahan yahay.

17 Guardian

Ilaaliye waa qof loo soo magacaabay inuu xanaaneeyo cunug ama qof dhalainyaro ah haddii aysan haysan qof iyaga xanaaneeya.

18 Hobbies

Hobbiyada (balwadaha) waa waxyaalaha uu qofku sameeyo waqtiyadiisa firaaqada si uu ciyaar ama madadaalo uga helo.

19 Home Office

Waa waaxda dawladda ee la macaamiloota dhamaan arrimaha gudaha ee waddanka Ingiriiska. Waxay sidoo kale masuul ka yihiin arrimaha socdaalka, deggenaanshaha iyo ilaalinta baasaboorada ee waddanka Ingiriiska.

20 Humanitarian Protection

Kani waa sharciga la siiyay dadka loo diiday sharciga qaxootinimada laakiin aanan ku noqon karin waddankii ay asal ahaan ka yimaadeen maadaama ay dhici karto inay la kulmaan khatar xun ee nafsadooda ama shakhsi ahaan ama aanan bani'aadnimo ahayn ama macaamil baabi'in ama ciqaabis ah. Waxaa la siiyaa muddo seddex sano ah dhamaadka muddadaasna kiiska dib ayaa loo eegaa.

21 UK Border Agency (Home Office)

Adeega dawladu wuxuu ka masuul yahey xakamaynta socdaalka sida rasmiga ah layidhaa UK Border Agency.

22 Interpreter

Waa qof u tarjumi kara luqad lagu hadlo luqad kale sidaa darteed dadku qofba qofka kale waa uu fahmi karaa.



23 Key worker

Qofka shaqaalaha muhiimka ah waa qofka ka qayb qaata masuuliyada maamulitaanka kiiskaaga. Tan waxaa ka mid ah wax ka qabashada baahidaada, in adiga lagaa taxadaro iyo in dad kale lala hadlo adigoo lagu matalayo.

24 Legal representative

Oo sidoo kale loo yaqaan lawyer ama solicitor ama kuu ah legal representative waa qofka kaa hagi doona ka gudbida nidaamyada sharciga lagaga dalbanayo magangalyo waddankan Ingiriiska. Qofka sharci ahaan ku matalaya (legal representative) waxa uu la macaamiloon donnaa Home Office asagoo adiga ku matalaya iyo haddii loo baahdo, inuu diyaariyo kiiskaaga magangalyo doonka.

25 Local authority

Waa dawladda hoose ee laga soo doortay degaankaaga taasoo bixisa adeegyada sida caafimaadka, waxbarashada, social work, qorshaynta, iwm ee degaankaaga (waxaana loo yaqaan Glasgow City Council ee Glasgow). Waxaa ka jira 32 dawladdood ee hoose Scotland gudaheeda.

26 Pocket money

Waa lacagta aad jeebka ku haysato ee loogu talo galay inaad ku isticmaasho kharshyadaada maalinlaha ah iyo waxyaalaha yar yar ee aad u baahan tahay. Lacagtan waxaa la siin karaa dhalinyarada yaryar oo ay siinayaan dadka iyaga taageeraya.

27 Restrictions

Waa xadidaada ama xakamaynta la saaray isticmaalka ama ku raaxaysashada adeega.

28 Refugee Status

Waa sharciga la siiyay qof hadii Home Office uu go'aamiyo inay ka soo baxeen qeexitaanka qaxootinmo sida lagu sheegay xeerka 1951 Refugee Convention. Qofka sharciga qaxootinimda haysta waxaa sidoo kale la siiyay sharciga socdaalka ee Limited Leave to Remain ee gudaha waddanka Ingiriiska. Limited Leave to Remain waxa uu leeyahay waqti ku xaddidan illaa iyo 5 sano.

29 Residential unit

Qayb degaan (residential unit) waxay siinaysaa xanaanayn maalin iyo habeen ah caruurtaada iyo dadka dhalinta yar kuwaasoo lagu xanaaneeyo meel ka fog gurigaaga. Tan waxaa loogu talo galay caruur iyo dad dhalinyar oo da' walba leh.

30 Social worker

Qofka social worker ah waa qof loo tababaray inuu bixiyo talo, hagitaan, iyo taageero uu siiyo qoysaska, caruurta iyo dadka dhalinyarada ah. Waxaa sida badan shaqaalaysiiyay local authority.

31 Social Work Services

Social Work Services waa waaxaha local authority. Shaqadooda waxa ay tahay inay caawiyaan shakhsiyadka, qoysaska, kooxaha iyo jaaliyadaha.

32 Supported accommodation

Degenaanshaha dheer ama gaaban oo ay caawiyaan shaqaalaha bixin kara caawimaad xagga dareenka ah isla markaana kaa caawin kara helitaanka shaqo, tababar iyo tabarucaadnimo.

33 Supported carers

Dadka caawiya dadka dhalinta yar ee 16 sano ka wayn oo ay xanaanaysay adeegyada Social Work Services. Waxay sidan u sameeyaan iyagoo ku soo dhowaynaya guryahooda una soo bandhigaya iyaga caawimaad iyo taageero.

34 Welfare

Farxadda iyo wanaaga qofka dhalinta yar.

